

Toddobaadkiiba hal mar ayaan gurigaaga qashinka ka soo qaadaynaa. Kalandarka ayaad ka arkaysaa toddobaadka qashinka aan qaadayno. Qashinka afar nooc ayaa loo kala qaybiyaa. Qashin haraa ah, biraha iyo dhalooyinka alaabaha lagu rito, warqad/baakad/kaartoonka cabbitaanka iyo balaastigga guryaha lagu isticmaalo. Balaastigga guryaha lagu isticmaalo waxaa lagu keenayaa bac gaar ah oo geeska jaallaha ah laga surayo tanagga loogu tala galay warqadaha/baakadaha/kartoonnada cabbitaanka.

In qashinka la kala sooco waa muhiim si aad boos ugu hesho qashinka haraaga ah. Qashinka aan tanagyada ku jirin la qaadi maayo. Maalinta aan qashinka qaadayno waa in tanagyada qashinka la dhigaa meel ugu badnaan 5 mitir u jirta meesha uu gaariga qashinku istaago. Waa in barafka la xaaqaa si ay qofka qashinka qaadaya ugu fududaato in uu tanagga qaado. Haddii ay meeshu sibibix tahay waa in lagu shubaa wax sibibixa ka baabbi'ya.»

Qalabkan ayaa loo baahan yahay in uu qof walba haysto. Santuukha guduudan waxaad ku aruurinaysaa qashinka khatarta ah ee kala duwan sida batariga, riinjiga, guluubyada iyo waxyaalaha yaryar ee elektaroonigga ah. Marka uu santuukhu buuxsamo ayaad gaynaysaa goobta qashinka la geeyo ee kuugu dhow. Nala soo xiriir haddii aadan haysan qaar qalabkan ka mid ah.

Dhammaan noocyada kale ee qashinka ah waxaa bilaash lagu geyn karaa goobta qashinka ee kuugu dhow. Kuwaan waxaa tusaale ahaan ka mid ah saabaanka, baakad weyn oo kuwa wax lagu duubo ah, biraha, qalabka elektaroonigga ah, qashinka dhismaha, qashinka ardaagga guriga iwm. Iyo qashinka khatarta ah sida riinjiga, batariga, guluubyada iwm.





Wakhtiyada qashinka la qaado 2018

Jannaayo								Febraayo								Maarso							
Toddo-baadka	Nes Krødsherad*	Gol Flå	Hol Krødsherad**	Ál	Hemseidal			Toddo-baadka	Nes Krødsherad*	Gol Flå	Hol Krødsherad**	Ál	Hemseidal			Toddo-baadka	Nes Krødsherad*	Gol Flå	Hol Krødsherad**	Ál	Hemseidal		
	Isniin	Talaado	Arbaco	Khamiis	Jimco	Sabti	Axad		Isniin	Talaado	Arbaco	Khamiis	Jimco	Sabti	Axad		Isniin	Talaado	Arbaco	Khamiis	Jimco	Sabti	Axad
1	1	2	3	4	5	6	7	5				1	2	3	4	9				1	2	3	4
2	8	9	10	11	12	13	14	6	5	6	7	8	9	10	11	10	5	6	7	8	9	10	11
3	15	16	17	18	19	20	21	7	12	13	14	15	16	17	18	11	12	13	14	15	16	17	18
4	22	23	24	25	26	27	28	8	19	20	21	22	23	24	25	12	19	20	21	22	23	24	25
5	29	30	31					9	26	27	28					13	26	27	28	29	30	31	

Abril								Maajo								Juun							
Toddo-baadka	Nes Krødsherad*	Gol Flå	Hol Krødsherad**	Ál	Hemseidal			Toddo-baadka	Nes Krødsherad*	Gol Flå	Hol Krødsherad**	Ál	Hemseidal			Toddo-baadka	Nes Krødsherad*	Gol Flå	Hol Krødsherad**	Ál	Hemseidal		
	Isniin	Talaado	Arbaco	Khamiis	Jimco	Sabti	Axad		Isniin	Talaado	Arbaco	Khamiis	Jimco	Sabti	Axad		Isniin	Talaado	Arbaco	Khamiis	Jimco	Sabti	Axad
13							1	18		1	2	3	4	5	6	22					1	2	3
14	2	3	4	5	6	7	8	19	7	8	9	10	11	12	13	23	4	5	6	7	8	9	10
15	9	10	11	12	13	14	15	20	14	15	16	17	18	19	20	24	11	12	13	14	15	16	17
16	16	17	18	19	20	21	22	21	21	22	23	24	25	26	27	25	18	19	20	21	22	23	24
17	23	24	25	26	27	28	29	22	28	29	30	31				26	25	26	27	28	29	30	
18	30																						

Maalmaha ciidaha ah oo idil waa la qaadaa marka laga reebo khamiista 17.05 markaas oo la qaadi doono sabtida 19.05

***Khadka isniinta Krødsherad:** Flå grense – Sole Hotell/Fv 192 Noresund-Ringnes-vegkryss Bråtastua.

****Khadka arbacada Krødsherad:** Olberg-Ringerike iyo Modum grenser, FV 191 Krøderen – Sigdal grense.

QASHIN HARA'A AH	WARQADO IYO BAAKADO	QASHINKA GURIGA EE BALAASTIGGA AH	DHALADA/ BIRAHA ALAABAHA LAGU RITO
<p>Raashin haraa ah Bacaha shaaha</p> <p>Warqadaha kafeega la miiray Warqadaha iyo baakadaha kushiinka Xafaayado Dhar, kabo Dhirta guryaha Ubax</p> <p>Qashinka haraaga ah bac ku rid oo afka ka xir, si ay nadaafadda tanagyadu u ficnaato.</p> <p>Qashinka aan khatarta ahayn, qalabka elektaroonigga ah, guluubyada, batariyada, Kuwan waxaa la geynayaa goobta qashinka la geeyo ee kuugu dow</p>	<p>Warqado, wargeysyo iyo iidheh Baakado yaryar Kaartoonnada caanaha -/ cabbitaanka Baakadaha alaabaha lagu duubto Waraaqaha xafiisyada, Bokhshadaha Ooriga ay ku duuban yihiin warqadaha faraha lagu qallajisto</p> <p>Tanagga ayaa iyaga oo sidooda ah lagu ridayaa. Balaastig ama baco warqado ah oo qashinka agagaarkiisa yaalla waxay hallaynayaan kala soocidda.</p> <p>Ha ku ridin buugaag gal adag leh</p>	<p>Bacaha balaastigga ah, bacaha iyo alumiiniyumka wax lagu shubto sida bacaha bunka, bacaha jibiska, bacaha shukulaatada iwm. Dhalooyinka iyo jirigaannada balaastigga ah ee cuntada, kuwa saabbuunaha iyo waxyaalaha jirka la marsado iwm. Dhalooyinka balaastigga ah ee cabbitaanka marka laga reebo dhalooyinka dukaammada lagu celiyo. Weelasha yoogarka iyo rommaha iwm. Baakadaha iyo weelasha lagu rito furuutka, khudaarta iyo hilibka. Baakadaha iyo weelasha ubaxa la gashado. Waxyaalaha lagu ciyaaro marka laga reebo qashinka EE, baaquli, koobab, suxuun, qaaddooyinka iyo mindiyaha halka mar la isticmaalo, baaldiyada, qasacadaha cuntada, qalabka ciyaaraha, bacaha dhismaha, baakadaha balaastigga ah iyo katabbaannada</p> <p>Inta la biya-raaciyo ayaa iyaga oo sidooda ah lagu ridayaa bac dulduleesha taas oo la surayo tanagga qashinka maalinta qashinka la qaadayo. Balaastigga wasakhda noqda waxaa lagu darayaa qashinka haraaga ah.</p> <p>Waxyaalo aan wax ku duubnayn oo uu qashin khatar ah ku jiray. Aan ahayn balaastigga adag iyo bacaha xaabada. Kuwan waxaa la geynayaa goobta qashinka lagu tuuro ee kuugu dhow.</p>	<p>Dhalooyinka sida kuwa malmalaaddada ee daboolka leh Dhalooyinka iyo qasacadaha cabbitaanka Qasacadaha birta ah ee raashinka Waraaqaha iyo weelasha alumiiniyumka ka samaysan</p> <p>Iyaga oo sidooda ah ayaa tanagga lagu ridayaa. Balaastig ama baco warqado ah oo qashinka agagaarkiisa yaalla waxay hallaynayaan kala soocidda.</p> <p>Lama oggola dhoobo, dhoobo nooc quraarad ah, koobabka cabbitaanka muraayad, weelka dhalada ah ee cuntada lagu foorneeyo ama daaqado. Kuwan waxaa la geynayaa goobta qashinka lagu tuuro ee kuugu dhow</p>